



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**  
**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**  
**KU SAABSAN**

**DHISIDDA GOLAHA WADATASHIGA QARANKA U XILSAARAN**  
**JIHEYNTA NIDAAM-SIYAASADEEDKA IYO TABAHA LOOGA**  
**GUDBAAYO MARXALADDA AGOOSTO 2016.**

### GOLAHA SHACABKA:


**Markuu arkay:** Go'aankii wadajirka ahaa ee 28<sup>kii</sup> Luuliyo 2015 lagu caddeeyey in doorasho qofkiiba hal cod ayan suurtoagal ahayn duruufaha uu dalka hadda ku sugan yahay awgeed;

**Markuu arkay:** In ay lagama maarmaan tahay in dhammaadka madasha Baarlamaanka 9<sup>aad</sup> ka hor laysla meeldhigo tabta ugu habboon oo lagu keeni karo xubnaha Golaha Baarlamaanka 10<sup>aad</sup> ee Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Soojeedinta xildhibaanno ka tirsan Golaha Shacabka Soomaaliya.

### Wuxuu talo kusoo jeedinaya:

1. In la dhiso Golaha Wadatashiga Qaranka oo xilkiisu yahay in ay sameeyaan la-tashi dadweyne ka dibna Golaha Shacabka Soomaaliya usoo jeediya tabta ugu habboon loo jihayn karo nidaam-siyaasadeedka lagu jiheynayo looguna gudbiyo Agoosto 2016;
2. In xubnaha dadweynaha ku matalaya Golaha Wadatashiga ay ka mid ahaadaan:
  - a) Xubno ka tirsan Xildhibaannada Qaranka ee Golaha Shacabka;
  - b) Xubno ka tirsan Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;
  - c) Xubno ka tirsan Maamul-Goboleedyada ku meel gaarka ah;
  - d) Xubno ka tirsan Gobollada Banaadir, Hiiraan iyo Shabellada Dhexe;
  - e) Xubno ka tirsan Bulshada Rayadka ah ee agaasiman ay kana mid yihiin Ururrada Siyaasadeed ee abaabulan; iyo
  - f) Xubno ka tirsan Beesha Caalamka oo goobjoogayaal ka ah.
3. Tirada hay'ad walba ugu qaybgaleysa waxaa isla soo meeldhigaya Guddoonka Baarlamaanka Federaalka iyo Guddoonka Xukuumadda Federaalka oo lasoo tashatay hay'adaha kale ee kor ku xusan.
4. Talooyinka iyo tabaha uu soo jeediyo Golaha Wadatashiga Qaranka si uu sharci u noqdo waxaa ansixin loo horkenayaa Golaha Shacabka waxaana lagu meelmarinayaa Xeer-Madaxweyne.

  
M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka